DEPARTMENT OF HEALTH

# Xirmada Wax ka bedelka lagu sameeyo ee Diiwaanka Dhalashada

Wixii sixitaan ah ama wax ku kordhinta diiwaanka dhalashada  waxay u baahan tahay wax ka bedel, marka isbedeladu dhacaan kadib markii la iibsado shahaadada dhalashada AMA kadib dhalashadii kowaad ee ilmaha, hadba kan soo horeeya. Soo buuxi foomka hoose oo keen dukumiintiyo taageeraya si aad u codsato wax ka bedelka diiwaanka dhalashada Minnesota.

Waxaad codsan kartaa wax ka bedelka macluumaadka soo socda ee ku jira diiwaanka dhalashada:

**Macluumaadka ilmaha/qofka**

- Magaca hore, dhexe, dambe (wax ka bedelka magaca oo buuxa waxay u baahan tahay amar maxkamadeed)
- Taarikhda dhalashada
- Wakhtiga dhalashada
- Tirada Dhalada (ie,dhalasho hal ilmo, dhalasho mataano ah, dhalasho saddex ilmood ah)
- Jinsiga
- Meesha dhalashada

**Macluumaadka Waalidka**

- Magaca (Magaca Koowaad, Magaca Dhexe, Magaca Dambe, darajada  – bedelidda magaca oo dhan waxay u baahan tahay amar maxkamadeed)
- Magacyada loo bixiyey wakhtigii dhalashada (magaca guurka koowaad kahor)
- Taarikhda dhalashada
- Meesha dhalashada

Isbedelka qaabka, sida codsiyada xarfaha farta waaweyn/farta yaryar ma  codsi wax ka beddel oo ansax ah. Diiwaanada dhalashada Minnesota waxay ku qoranyihiin dhammaan xarfo farta waaweyn ah sida u ah dhaqanka ugu wanaagsan ee uu dejiyey Ururada halbeegyada diiwaanka muhiimka ah ee Mareykanka.

Shay kasta oo aad rabto inaad wax ka bedesho ku qor sadar gaar ah sida hoos ku cad. Tiirka shaxda midig, ku qor sida aad rabto in shaygu uga muuqdo shahaadada cusub. Bogga saddexaad ee arjigu waxa uu leeyahay meel bannaan oo loogu talagalay in lagu qoro waxyaabaha dheeraadka ah ee qofku rabo in uu bedelo.

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Waalidka | Magaca koowaad ee waalidka kowaad<br>**OMAR** | Magaca dhexe ee waalidka kowaad<br>**ELMI** | Magaca dambe ee waalidka kowaad<br>**DIHOUD** | Magaca dambe guurka 1aad kahor<br>**DIHOUD** |
| | Magaca koowaad ee waalidka labaad<br>**WARES** | Magaca dhexe ee waalidka labaad<br>**ABDI** | Magaca dambe ee waalidka labaad<br>**DUALE** | Magaca dambe guurka 1aad kahor<br>**DUALE** |

| **Gaarkiisa u liis garee shay kasta oo wax looga beddelayo.**<br>**Eeg xaashida tilmaanta.** | **Sidee ayaad rabtaa in macluumaadku uga muuqdaan/loogu qoro shahaadada cusub?**<br>**Eeg xaashida tilmaanta.** |
|---|---|
| Shayga wax laga beddelayo<br>**TAARIIKHKA DHALASHADA EE WAALIDKA KOWAAD** | Ugu qor shahaadada cusub sidan<br>**06/15/1985** |
| Shayga wax laga beddelayo<br>**MAGACA KOOWAAD EE WAALIDKA LABAAD** | Ugu qor shahaadada cusub sidan<br>**WARIS** |

## Dukumiintiyada taageeraya

Wax ka beddelku wuxuu u baahan yahay dukumiinti taageeraya.

Waa inaad soo dirto ugu yaraan **hal** dukumiinti oo taageero ah si aad ugu **darto** macluumaadka ka maqan diiwaanka dhalashada.

Waa inaad soo dirto ugu yaraan **laba** dukumiinti oo taageeraya si aad wax uga **bedesho** macluumaadka ku qoran diiwaanka dhalashada.

Dukumiinti kastaa waa inuu:


1. Waa inaad u muujiso shayga aad rabto inaad ku darto ama u bedesho sida aad rabto inay uga muuqato shahaadada dhalashada ee cusub, IYO
2. Waa inaad tusto/muujiso ugu yaraan laba shay oo u dhigma waxa ku qoran warqadda dhalashada oo aadan codsanayn in wax laga bedelo.

Dukumiintiyadu waxaa loo baahanyahay inay muujiyaan ugu yaraan laba shay oo liiskan ku jira:

- Magaca dambe ee qofka
- taariikhda dhalashada qofka
- qofku meesha uu ku dhashay
- magaca waalidka
- taariikhda dhalashada waalidka
- meesha waalidku ku dhashay

## Dukumeentiyadu waa inay ahaadaan:

<table>
<tr>
<td>



<br>
La Aqrin Karo<br>
Dukumiintigu waa inuu ahaadaa mid la aqrin karo; xarfihiisa iyo ereyadiisaba waa in uu ahaadaa mid fasiix ah, oo aan humaag la khad isku qasan lahayn.
</td>
<td>


<br>
Aan Wax Laga Bedelin<br>
Dukumiintiyada ma haan karaan kuwo la tirtirtay ama qoraalkooda istilaab la saaray Qoraalka waa in aanu dabooleynin sharootada wax lagu dul qoro, ama khada cad (stickers), ama waxyaalaha qariya (blackouts).
</td>
</tr>
</table>




## Asal ah

Waa inaad keentaa dukumiintiyo asal ah, lama aqbalayo nuqulada ama sawirrada dijitaalka ah. Tusaale ahaan, waxaan u baahan nahay baasaboor dhab ah ama shahaadada dhalashada, koobi lama aqbalayo. Waan kuu soo celineynaa dhammaan dukumiintiyada asalka ah marka aan dhammeystirno wax ka beddelka.




## Ingiriis ahaan

Dukumiintiyada oo dhan waa in ay ku qornaadaan ad Ingiriis ama waa in lagu tarjumay af ingiriis. Turjumaad kasta waa in uu sameeyay turjubaan aqoon leh oo markaa kadibna ku sixiixaa tarjumaadda nootaayo dadweynaha horteeda.




## La Xaqiijiyay ama La Tasdiiqay

Dukumiintiyadaada waa in la xaqiijiyay ama la tasdiiqay. Dukumiintiyada la zaqiijiyay — sida dhalashada, dhimashada, iyo shahaadooyinka guurka; baasaboorada; foomamka ka saarista militariga; iyo amarrada maxkamadda — waxaa lagu daabaci karaa warqad gaar ah ama waxaa saaran shaabad caadi ah ama shaabadda seelka ah. Dukumiintiyada kale, sida kuwa iskuulada, kuwa caafimaadka, ama kuwa ah diiwaanada adeegyada bulshada, waa in la soo tasdiiqay. Taas macnaheedu waa qof shaqaale ah oo ka socda ururka soo saaraya dukumiintiga ayaa wuxuu qoraal ahaan ku cadeynayaa in uu yahay nuqul run ah oo sax ah oo ku jira diiwaanka faylka. Ugu yaraan, dukumiinti la tasdiiqay waa in ay ku qornaadaan magaca iyo cinwaanka ururka, waana in qof shaqaale u ah ururka uu saxiixo oo uu taariikhdana ku qoro.

## Dokumentiyada taageeraya taariikhdooda

Dukumentiyada taageeraaya wax ka bedelka diiwaanka dhalashada waa in ay ku cadahay da'da qofka oo cayiman:

- **Qofka toddobo sano ayuu ka yaryahay:** Dokumentiyada waa in la sameeyay sannadka koowaad ee uu qofku dhashay AMA ugu yaraan hal sano ka hor intaadan saxiixin foomka wax ka bedelka da'da.
- **Qofku waa toddobo sano jir ama wuu ka weynyahay:** Dokumeentiyada waxaa la sameeyay seddex sano ka hor dhalashada qofka AMA ugu yaraan toddobo sano ka hor taariikhda la saxiixay foomka wax ka bedelka dhalashada.

Taariikhda koowaad ee dukumeenti la sameeyay ayaa ah taariikhda saxda ah. Dukumeentigu wuxuu yeelan karaa taariikho dhowr ah, laakiin taariikhda la sameeyay ayaa ah tan muhiimka ah. Caafimaadka, adeegyada bulshada, ama diiwaanada dugsiga, waxaan u baahanahay inaan aragno taariikhda markii maadada diiwaanku ay bilowday ka qaybgalka ama helitaanka adeegyada ururka. Shahaadooyinka guurka, dhalashada, iyo baabtiiska, waxaan raadineynaa taariikhda ay dhacdada dhacday. Baasaboorka, taariikhda ku habboon waa markii ugu horreysay ee baasaboorka la bixiyay. (Haddii baasaboorkii ugu horreeyay ee lagu siiyo uu dhacay, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad soo gudbiso marka lagu daro baasaboorkaaga hadda ee aan dhicin.)

# Dokumentiyada taageeraya ee la aqbali karo

Xafiiska qaabilsan Diiwaanada Muhiimka ah wuxuu aqbalaa dukumentiga hoos ku taxan waxaana laga yaabaa inuu go'aamiyo dukumentiyada kale ee la aqbali karo. Dukumeentiyadu waa inay buuxiyaan dhammaan shuruudaha kor ku xusan oo ay taageeraan wax ka bedelka la codsaday.

- Diiwaanka iskuulka Mareykanka K-12, ama diiwaanka buundooyinka/dhibcaha rasmiga ah ee kulliyad Maraykan ah oo la shahaadeeyey
- Diiwaanka cisbitaalka, rugaha caafimaadka, ama diiwaanka adeegyada bulshada ee la xaqiijiyay
- Baasaboor ansax ah (aan dhicin) – **AAN AHAYN** nuqul nootaayo ah
- Nuqulka asalka ah ama la shahaadeeyay ee warqadaha sii deynta militariga Maraykanka (sida foomka DD214)
- Nuqul shahaadaysan ee shahaadada guur ah (dawlad soo saartay).
- Amarka maxkamadeed ee la xaqiijiyay ee ka yimid maxkamadaha Maraykan ah oo:
  - Muujinaysa magaca qofka iyo taariikhda dhalashada sida ay hadda ugu qoranyihiin diiwaanka dhalashada
  - Si cad u sheeg waxyaabaha  laga bedelayo diiwaanka dhalashada (haddii wax laga beddelayo macluumaadka kale ee aan ahayn magaca qofka)
- Nuqul la shahaadeeyey oo ah shahaadada dhalashada ee ilmaha
- Nuqul la shahaadeeyey oo ah shahaadada dhalashada ee waalidka ama walaalaha (kaliya in wax laga bedelo macluumaadka waalidka)
- Shahaadada baabtiisamka ee Mareykanka ama diiwaanka kaniisada kale iyo lambarka taleefanka kaniisad Markan ah (si loo xaqiijiyo diiwaanka)
- Nuqul asal ah ama shahaadaysan ah oo ah Shahaadada Jinsiyad siinta IYO Codsiga la shahaadeeyey ee beddelka Magaca
- Diiwaangelinta rasmiga ah ee qabaa'ilka

- Lambarada aqoonsiga (https://secure.ssa.gov/poms.nsf/lnx/0203325025) ee laga keenay  Maamulka Sooshal Sakuuratiga ee Maraykanka

## Dukumentiyada AAN LA Aqbalaynin

- Shahaadada dhalashada xasuusta ah ee isbitaalka
- Shattiga darawalnimada
- Kaarka aqoonsiga ama ogolaansha barista darawalka ee Gobolka, shaqaalaha, ama kaarka aqoonsi ama ogolaanshah barista darawalka ee kale
- Kaarka ama bayaanka sooshal sakuuratiga
- Arjiga nooc kasta ah
- Kaarka caymiska ama xeerka caymiska
- Jeegga dabadiisa
- Canshuur celinta
- Baanka ama biilka
- Maqaalka wargeyska

### Jinsiga

Si loo bedelo jinsiga qofka  ku jira diiwaanka dhalashada, codsaduhu waa inuu u soo diro xafiiskeena mid ka mid ah kuwan soo socda:

- **Warqad asal ah oo ka timid oo uu saxeexay dhakhtar shati haysta oo:**
  - Tixraacaysa magaca qofka iyo taariikhda dhalashada ee ku jira diiwaanka dhalashada hadda oo,
  - Caddaynaysa in qofka loo sameeyay daawaynta "kiliinikada/caafimaadka ee ku habboon" oo ah bedelka jinsiga.

  **AMA**

- **Nuqul la shahaadeeyey oo ah amar maxkamadeed ah oo si gaar ah u tilmaamaya wax ka bedelka jinsiga qofka ee ku qoran diiwaanka dhalashada.**

### Beddelidda magacyada waalidka ee diiwaanka ku jira

Amarka maxkamadeed ayaa loo baahan yahay si loo beddelo magaca buuxa ee waalidka ee ku qoran diiwaanka dhalashada qofka. Amarka maxkamadu waa inuu:

- Waa in uu qoro higaada magaca(magacyada) waalidka ka hor iyo kadib beddelaada magaca, iyo
- Waa inaad u dirto Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah inuu bedelo magacyada waalidka ee ku jira diiwaanka dhalashada ilmaha.

Waa in amar maxkamadeed oo lagu bedelayo magacyada waalidka ee diiwaanada dhalashada ee badan uu taxayo magaca ilmo kasta.

## Fadlan ogow

- Kharashyada khidmadaha lama soo celin karo
- Codsiyada wax ka bedelka diiwaanka dhalashada waxa kaliya oo buuxin kara Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah (Waaxda Caafimaadka Minnesota); Lagama helo xafiisyada diiwaanka muhiimka ah ee degmada.

- Waanu soo celin doonaa arjigaaga oo ay la socdaan dukumiintiyadaada taageerada ah haddii arjiga aan si buuxda loo soo buuxin, haddii aan lacag bixintaadu ku filnayn, ama haddii dukumiintiyada taageerada ah ayna ku filnayn codsiga.
- Bixi hal khidmad oo dhan  $21 khidmada keenista degdega ah ee boostada haddii aad weydiisatay wax ka bedelka diiwaanada dhalashada oo badan. Dukumiintiyadu waa inay wada aadaan cinwaan isku mid ah.
- Codsiyada aan la xallinin waa la xirayaa 12 bilood kadib marka aanu helno. Marka codsiga la xiro, macaamiilku waa inay soo gudbiyaan codsi cusub oo ay bixiyaan kharashka mar labaad si loo cusbooneysiiyo diiwaanka iyo/ama si loo helo diiwaannada muhiimka ah.
- Hubi inaad ku saxeexdo arjiga notary public hortiisa.
- Kharashka dib u eegista iyo ka shaqaynta wax ka beddelku waa mid aan laguu soo celin karin oo kuma jiraan kharashka shahaadada dhalasho oo cusub. Lacag bixin kaash ah ha soo dirin.
- Ku soo dar baqshadda kharashkeeda boostada lasii bixiyey oo adeeg degdega ah codsigaaga haddii dukumiintigaaga taageerada ah ama shahaadooyinka cusub ay aadayaan ciwaan ka baxsan Mareykanka.
- Hubi in dukumiintiyadaada taageerada ah ay buuxiyeen dhammaan shuruudaha kor ku xusan. Waanu soo celin doonaa dukumiintigaaga asalka ah marka aan dhammeyno kas shaqaynta arjigaaga.
- Ka hel macluumaadka ku saabsan helitaanka amarka maxkamadda ee Minnesota Waaxda Garsoorka ee Minnesota (https://mncourts.gov/)

Soo wac 651-201-5970 ama email u soo dir health.vitalrecords@state.mn.us wixii su'aalo ah.

# Codsashada Wax ka beddel lagu sameeyo Diiwaanka Dhalashada

Isticmaal foomkan si aad u codsato ku daritaanka ama wax bedelka macluumaadka ku jira diiwaanka dhalashada ee Minnesota. Waa inaad sidoo kale keento dukumiinti taageeraya wax ka beddelka la codsaday (fiiri tilmaamaha).

*Waa sharci darro in la bixiyo macluumaad been ah si wax looga beddelo diiwaanka muhiimka ah, waxaana laga yaabaa in lagu ganaaxo, xabsi in lagu geeyo, ama labadaba.*

<table>
<tr><td colspan="5">Maxaa hadda ku qoran diiwaanka dhalashada?</td></tr>
<tr><td rowspan="2">Ilmaha/qofka</td><td>Magaca koowaad ee ilmaha/qofka</td><td colspan="2">Magaca dhexe ee ilmaha/qofka</td><td>Magaca dambe ee ilmaha/qofka</td></tr>
<tr><td>Taariikhka dhalashada (MM/DD/YYYY)</td><td>Jinsiga</td><td>Magaalada dhalashada ee Minnesota</td><td>Degmada dhalashada ee Minnesota</td></tr>
<tr><td rowspan="2">Waalidka</td><td>Magaca koowaad ee waalidka kowaad</td><td>Magaca dhexe ee waalidka kowaad</td><td>Magaca dambe ee waalidka kowaad</td><td>Magaca dambe guurka 1aad kahor</td></tr>
<tr><td>Magaca koowaad ee waalidka labaad</td><td>Magaca dhexe ee waalidka labaad</td><td>Magaca dambe ee waalidka labaad</td><td>Magaca dambe guurka 1aad kahor</td></tr>
</table>

| **Gaarkiisa u liis garee/qor shay kasta oo wax looga beddelayo.**<br>**Eeg xaashida tilmaanta.** | **Sidee ayaad rabtaa in macluumaadku uga muuqdaan/loogu qoro shahaadada cusub?**<br>**Eeg xaashida tilmaanta.** |
|---|---|
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |

***Si aad wax uga beddesho waxyaabo dheeraad ah, eeg bogga ugu dambeeya ee foomka.***

**Macluumaadka Codsadaha - Waa maxay waxa aad isu tihiin qofka leh diiwaanka dhalashada?**

Sharci ahaan, kaliya qofka leh diiwaanka dhalashada, waalidkood, ama ilaaliyaha sharciga ah ama wakiilkooda ayaa codsan kara wax ka beddel.

- ☐ Anigu waxaan ahay qofka leh diiwaanka waxaan ahayn 18 ama ka weyn (haddii aad haysato amar maxkamadeed, adiga - ma aha waalidkaa - waa inaad tahay codsadaha)
- ☐ Waxaan ahay waalid ku qoran diiwaanka
- ☐ Waxaan ahay ilaaliyaha ama wakiilka sharciga ah ee qofka ay ku saabsantahay. **Waa inaad arjiga soo raaciso nuqul la shahaadeeyay ee amarka maxkamad Maraykan ah**. Amarka maxkamadu waa inuu kugu magacaabo in aad tahay ilaaliyaha sharciga ah ama kugu qoray in aad tahay wakiilka sharciga ah.

<table>
<tr><td colspan="4">Magac dhammaystiran ee codsadaha</td><td>Taariikhka dhalashada (MM/DD/YYYY)</td></tr>
<tr><td colspan="4">Ciwaanka wadada (adeeg keenista boostada ee Degdega ah laguma geyn doono sanduuqyada PO Box ama cinwaanada APO.)</td><td>Lambarka Abaartmenti/guriga</td></tr>
<tr><td>Magaalada</td><td>Gobolka</td><td>Zip code</td><td>Taleefanka maalintii (10-lambar)</td><td>Email</td></tr>
</table>

| **Magaca codsadaha:** |
|---|
| **WAA LOO BAAHAN YAHAY – Foomkan ku saxiix nootaayo dadweyne hortiisa ( notary public)** |
| *Waxaan caddaynayaa in macluumaadka aan ku bixiyey arjigan uu yahay mid sax ah oo dhammaystiran sida ugu fiican ee ogaalkayga ah.* |
| Saxeexa codsadaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Nootaayada** | La igu hor saxiixay ama la igu caddeeyay maalinta ee 20 | | Shaabadda/tiimbraha Nootaayaha |
| | Magaca qoran ee nootaayada dadweynaha | | |
| | Saxiixa nootaayada dadweynaha ( notary public) | Diiwaankaygu wuxuu dhacayaa | |

| **Khidmadaha codsiga iyo diiwaannada** | | **Khidmadaha** | |
|---|---|---|---|
| Ka shaqaynta codsiga wax ka bedelka | | **$40** | **$40** |
| Shahaadada dhalashada ee ugu horraysa ee wax laga beddelay | | **$26** | |
| Shahaadooyinka dhalashada ee dheeraadka ah | # tirada koobiyo dheeriga ah | **$19 midkiiba** | |
| **Ka shaqaynta** | | **Khidmadaha** | |
| Heerka caadiga ah - codsiga waxaa looga shaqeeyaa sida ay u soo kala horreeyaan | | **$0** | |
| Degdeg - codsiga wax laga haraysiinayaa codsiyada caadiga ah (kuma jirto keenis degdega ah) | | **$20** | |
| **Ku dirista boostada** | | **Khidmadaha** | |
| Waraaqaha Boostada Heerka Caadiga ah | | **$0** | |
| Keenista Boostada ee degdega ah (Calaamadi halkan ☐ in aad saxiix uga baahan tahay.) | | **$21** | |

- **Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah iyo adeega boostada degdega ah masuul kama ah keenista aan u baahnayn saxiix. Adeegyada boostada degdega ah ma geyn doonaan sanduuqyada PO Box ama cinwaannada APO.**
- Si loogu soo diro meel ka baxsan Maraykanka, waa inaad arjigaaga soo raaciso baqshadda adeega degdega ah ee boostada oo kharaskeeda boostada lasii bixiyey.

| **Wadarta lacagta la rabo** | *Khidmado aan laguu soo celinayn ayaa laga rabaa arjiga.* | |
|---|---|---|

| **Qaabka lacag bixinta** | | |
|---|---|---|
| ☐ **Credit card (Kaarka deynta)** MasterCard/VISA/Discover | Magaca kaarka ku qoran | Valid thru (Ansax ilaa) (MM/YY) |
| | Lambarka kaarka: | 3-da lambar ee Koodhka |

| | | |
|---|---|---|
| ☐ **Jeeg** | Lambarka Jeegga | **U qor jeega ama money order Minnesota Department of Health.** HA SOO DIRIN KAASH. Jeegaga loo soo celiyo lacag la'aanta waxay keeni doonaan ganaax dhan $30. Waxa kale oo aad wajihi kartaa ciqaab madani ah. |
| ☐ **Money order** | Money order# | |

| **Magaca codsadaha:** | |
|---|---|
| **U soo dir arjigaaga iyo lacag bixinta:** | **Codsiyada aan dhamaystirnayn** |
| Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)<br>Office of Vital Records (Xafiiska Diiwaanada Muhiimka ah)<br>**Boostada:** PO Box 64499, St. Paul, MN 55164-0499<br>**Keenista/u geynta:** 625 Robert St. N, St. Paul, MN 55155 (ma jiro adeeg miiiska diiwaanada muhiim ah oo goobtan jooga) | Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah wuu soo celiyaa codsiyada aan dhamaystirnayn, aan lagu hor saxeexin nootaayo dadweyne, ama aan si buuxda lacagta loo bixin wakhtiga codsiga. Codsiyada aan la xallinin waa la xirayaa 12 bilood kadib marka aanu helno. Marka codsiga la xiro, macaamiilku waa inay soo gudbiyaan codsi cusub oo ay bixiyaan kharashka mar labaad si loo cusbooneysiiyo diiwaanka iyo/ama si loo helo diiwaannada muhiimka ah. |
| Haddii aad qabto **su'aalo**, kala xiriir Xafiiska Diiwaanka Muhiimka ah health.vitalrecords@state.mn.us ama 651-201-5970. | |

Isticmaal boggan oo keliya haddii aad buuxisay dhammaan sadarada ku yaalla bogga koowaad ee arjiga.

| **Gaarkiisa u liis garee/qor shay kasta oo wax looga beddelayo** | **Sidee ayaad rabtaa in macluumaadku uga muuqdaan/loogu qoro shahaadada cusub?** |
|---|---|
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |
| Shayga wax laga beddelayo | Ugu qor shahaadada cusub sidan |